

Hubinta liiska Maqalka iyo Hadalka.

Dhalashada ilaa saddex bilood

- La qabsiga dhawaaq la garanayo ama codad
- Waa naxaa isaga oo ka boodaya dhawaaqa degdegta ah

3 ilaa 6 bilood

- Wuxuu u leexiya madaxa iyo indhaha dhinaca dhawaaq xiisaha leh
- Wuxuu u muuqdaa inuu wax dhegaysanayo
- Wuxuu ugu kacaa dhawaaqa si sahlan
- Wuxuu bilaabaa inuu sameeyo dhawaaq hadal u eg

6 ilaa 12 bilood

- wuxuu fahmaa erayo sahlan sida 'maya' iyo 'nabaday'
- wuxuu bilaabaa inuu koobi gareeyo dhawaaqyo
- wuxuu u leexiyaa madaxa dhawaaq khafiifa

12 bilood 18 bilood

- Wuxuu u muuqdaa inuu fahmayo erayo badanasbuuc walba
- Marka la weydiiyo, wuxuu tilmaamaa dad, jirka qayb ka mid ah ama tooyis
- Wuxuu raacaa awaamiirt sahlan sida 'fariiso'
- Wuxuu yiraahdaa laba ilaa saddex eray oo run ah sida 'kubbad, 'ey', 'gaari'

Haddii aad dareen ka qabto ilmahaaga maqalkiisa, la xiriir dhakhtarka ilmahaaga ama shaqaalaha rugta caafimaadka agtaada ah.

Reviewed 2018




www.health.qld.gov.au/healthyhearing

Barnaamijka Maqalka Caafimaadka
gaba ee Queensland Health
ujeedkeedu waa aqoonsiga carruurta
yaryar ee qabta dhega la'aan jooqto
ah. Waa lacag la'aan waxaana helli kara
dhamaan carruurta Medicare-ka xaga u
leh ee ku sugan Queensland.

Language: Somali

ilmahaaga baaristiisa maqalka

Sid ee ku ogaanayaa haddii aan ku maqlay?



Queensland
Government

ilmahaaga baaristiisa maqalka

Maqal caafimaad qabaa aad ayuu muhiim ugu yahay ilmahaaga hadalkiisa iyo horumarka luqadiisa bilaha ugu horreeya noloshiisa. Hal ilaa laba ilmood kunkii ilmood ayaa yeellan doona dhega la'aan buuxda.

Haddii maqal la'aantu aanay ku soo kabsan waqti hore, waxay saamaynaysaa ilmahaaga hadalkiisa iyo koritaanka luqadiisa iyo wax ku barashada mustaqbilka dugsiiga.

Qayb ka mid ah hubinta caafimaadka ilmaha

Barnaamijka Maqalka Caafimaadka qaba waxa dantiisu tahay in la ogaado carruurta ku dhalatay lumitaanka maqalka oo joogto ah. Waa lacag la'aan waxaana helli kara carruurta dhamaantood qabta maqal la'aan joogto ah. Waa lacag la'aan waxaana helli kara dhamaan carruurta ku dhalatay Queensland oo xaq u leh medicare-ka.

Ilmahaaga waxaa la siinayaa dhowr baaritaan oo caafimaadka ah ka dib markay dhashaan. Kuwaas mid ka mid ahi waa baarista maqal la'aanta. Baaritaankaas waa in la sameeyaa ka hor inta aan adiga iyo ilmuhu ka bixin isbitaalka, ilmahaagu weli waa heli karaa baaritaan bukaan socod ahaan ka dib markaad guriga aado.

Sidee lagu sameeyaa baarista?

Baarista maqalku wax ma yeellayso ilmahaaga. Kalkaliso caafimaad ama qof loo tababaray baarista maqalka ayaa samayn doona baaritaanka marka ilmahaagu degan yahay ama jiifo. Dhowr pads ayaa si tartiiba loo dhigayaa ilmahaaga madaxiisa waxaana si tartiiba loo gelinayaa earphone debecsan dheg walba. Pads-ku waxay duubi doonaan ilmahaaga falceliskiisa dhawaaqa.

Goorma ayaan ogaanayaa natiijada?

Natiijooyinka baaritaanka waxaa la ogaan doonaa isla markiiba, waana lagu qorayaa ilmahaaga buuggisa Diiwaanka Caafimaadka Shakhsiyeed. Shakhsiga samaynaya baaritaanka ayaa kaala hadli doona natiijooyinka. Weydii haddii ay jiraan wax aadan hubin.



Ballanta baarista maqalka ee

.....
Taariikhda
Waqtiga
Meesha

Maxay natiijada 'xawilid' macneheedu tahay?

Natiijada 'xawilida' oo baarista maqalku waxaa sababi kara dhowr waxyaallood:

- Ilmahaagu ma deganayn intii baaristu socotay.
- Waxaa laga yaabaa inuu jiray dhawaaq agagaaraha ah intii baaritaanku socday.
- Waxaa laga yaabaa in ilmahaagu lahaa dheecaan ama xirnaansho mudo gaaban ah dhegta dhalashada ka dib.
- Tira yar oo carruur ah ayaa yeellan kara lumitaanka maqalka ku meelgaar ah ama joogto ah. Heerka dhega la'aanta ayaa isbedeli kara heer hoose ilaa aad u weyn.

Haddii ilmahaagu ugu horreeyaa muujiyo natiijada 'xawilida' hal dheg ama labada dhegoodba, baaritaan labaad oo labada dhegood ah ayaa la samayn doonaa.

Haddii ilmahaaga baaritaankiisa labaad muujiyo natiijada 'xawilid' mid ama labada dhegoodba waxaa lagu xawili doonaa dhakhtarka dhegaha si loo baaro sidoo kale waxaa lagu xawili doonaa adeega kaalmada qoyska. Waxaa lagu siin doonaa qoraal siyaada ah oo sharxaya arrintaan si faahfaahsan.

Xaggee ka helli karaa macluumaad intaas ka badan.

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad dheeraada oo ku saabsan baaritaanka maqalka, la xiriir dhakhtarka agtaada ah, ama shaqaalaha rugta caafimaadka agtaada ah.